

# Qiimo dhimista korontada



Hubi inaad heshid qiimo-dhimista korontada (energy concessions) haddii aad leedahay kaarka lacag dhimista (concession card)

Haddii aad haysatid Kaarka Daryeelka Caafimaadka (**Health Care Card**), Kaarka Qiimo-dhimista Hawlgabka (**Pension Concession Card**), ama Kaarka Dahabka ee Arrimaha Veteran ka (**Veteran Affairs Gold Card**) waxaad xaq u leedahay inaad heshid koronto iyo gaas jaban. Haddii aanad haysan mid ka mid ah saddexdan kaaarar ee qiimo-dhimista, ma dalban kartid in qiimaha lagaa dhimo.

Qiimo-dhimista korontada waxay sababi kartaa inay kuu baaqato boqollaal doolar sannad kasta. Haddii aad haysatid kaarka qiimo-dhimista, wac shirkada kaa iibisa korontada oo weyddii inay kuu xaqiijiyaan inaad heshid qiimo-dhimista korontadaada.

Haddii aad guri ka guurto, bedeshid shirkadaha korontada, ama aad heshid kaar cusub oo qiimo-dhimista ah, biilkaaga qiimo-dhimista (discount) looma sameyn doono. Hubi inaad si joogto ah u eegtid biilkaaga si aad u xaqiijisid inaad hesho qiimo-dhimista korontadaada.

## Tusaalooyinka kaadhka qiimo-dhimista:



Health Care Card



Pension Concession Card



Veterans Affairs Gold Card

## Sida loo weyddiisto shirkada kaa iibisa korontada inay kuu hubiyaan inaad heshid qiimo-dhimista korontadaada

### Intaadan wicin ka hor:

Hubi inaad heysatid:

- Biil koronto ama gaas oo dhawaanahan ah
- Faahfaahinta akoonkaaga korontada (magaca, cinwaanka, taariikhda dhalashada, akoon nambarka)
- Kaadhkaaga qiimo-dhimista

### Ma u baahan tahay turjubaan?

Biilasha korontadaada waxaa ku jiri doona macluumaad ku saabsan adeega turjubaanka lacag la'aanta ah.



### Markaad wacdid:

Usheeg shirkada kaa iibisa korontadaada:

**“Waxaan haystaa kaarka qiimo-dhimista (concession card). Fadlan ma hubin kartaa in aan helayo dhammaan qiimo-dhimista korontadeyda”**



## Deeqaha Gargaarka (Relief Grant):

Haddii aadan bixin karin biilasha korontadaada, waxaad awoodi kartaa inaad hesho Deeq Gargaar (Utility Relief Grant). Tani waa kaalmo lacag-bixin \$650 ah oo lagaaga caawinayo in lagu bixiyo biilasha aan la bixin. Deeqdan waxaa loo heli karaa dadka haysta kaadhka qiimo-dhimista ee ay haysato dhibaato dhaqaale. Wac shirkada korontada kaa iibisa oo weyddii Deeqda Gargaarka (Utility Relief Grant).